SOMALI DIALOGUE PLATFORM

Luulyo 2023

# Heshiiska siyaasadeed ee dowlad-goboleedka Galmudug

## Aasaaska taageeridda geeddi-socod siyaasadeed oo macno leh loona dhan yahay

**Faallo Kooban:** SDP.03

# Hordhac

Galmudug ayaa ilaa iyo dhawaanahan loo arkayay dowlad-goboleed ay colaado iyo kala qeybsanaan badani ka jiraan, oo ay qaabeeyeen colaadihii laga dhaxlay dagaalladii sokeeye ee Soomaaliya. Khilaafyada joogtada ah ee beelaha ku saleysanaa ee u dhexeeyay kooxaha siyaasadeed awgood, waxaa lagu sifeeyay in aysan ka jirin awood siyaasadeed oo mideysan. Xitaa iyadoo gobollada kale ee Soomaaliya ay sameysteen maamullo kumeelgaar ah oo markii dambe noqday dowlad-goboleedyo xubno ka ah dowladda federaalka, Galmudug ayaa ahayd maamul ay qeybiyeen kooxo doonayey in ay iyagu maamul u dhisaan. Geeddi-socodkii dhismaha dowlad goboleedka Galmudug, oo lasoo gebagebeeyey 2015-kii, ayaa awoodi waayey in uu taageero ka helo kooxo hubeysan oo dhowr ah, rabshadahaas ayaana udub-dhexaad u noqday nidaamka siyaasadeed. Xaaladdan ayaa si cad usoo muuqatay kadib markii ay sanadkii 2020 dheceen dagaallo la xiriiray hanaankii doorasho ee u dambeeyay, iyo sidoo kale bishii Oktoobar ee sanadkii 2021, markii dagaal uu ka dhex billowday dowlad-goboleedka iyo kooxda suufida ah ee Ahlu-sunna Wal Jamaaca (ASWJ).

Inkastoo ay khilaafyadan soo jireen sanado badan, waxaa Galmudug kasoo muuqanaya isbeddello wanaagsan. Maamulka Galmudug waxa uu leeyahay mucaarad aan badneyn (sida ASWJ) mana jiraan maamullo kale oo ka dhisan gudaha Galmudug oo loollan kula jira. Al-Shabaab ayaa dhawaan laga saaray dhul baaxad leh oo muhiim ah oo ka tirsan maamulka waxa ayna haatan ka taliyaan keliya degmooyinka Ceelbuur iyo Galhareeri. Xiriirkii xumaa ee u dhexeeyay Puntland iyo Galmudug iyo xiisadihii ka jiray magaalada Gaalkacyo, oo u dhexeeyay labada maamul, ayaa muddooyinkii dambe yaraaday. Dhismaha goleyaasha degmooyinka ayaa sidoo kale si habsami leh uga socda Galmudug oo dhan.

Sikastaba ha ahaatee, caqabado ayaa weli jira. Beelo badan ayaa hubeysan oo leh awood madax bannaan. Inkastoo la wiiqay, haddana al-Shabaab waxa ay weli khatar amni ku yihiin maamulka Galmudug. Ilaha dakhliga ee maamulka iyo awoodda canshuur uruurinta ayaa xaddidan, taasoo ka horjoogsaneysa maamulka inuu ballaariyo bixinta adeegyada bulshada. Si looga gudbo siyaasaddii qalafsaneyd ee Galmudug ka jirtay, islamarkaana loo qiimeeyo isbedellada hadda jira, faalladan kooban waxa ay soo bandhigeysaa hannaan heshiis siyaasadeed. Heshiis siyaasadeed waxaa loola jeedaa faham la wadaago iyo ka go'naan la xiriirta isticmaalka awoodda, oo ay jilayaasha siyaasaddu wadaagaan heshiis aasaasi ah oo ku aadan awoodda hay'adaha dowlad-goboleedka, iyo sida awooddaas loogu tartami karo si nabad ah.[1] Sidaas darteed, khilaafyada iyo colaadaha muddada dheer ka jiray Galmudug waxaa lala xiriirin karaa maqnaanshaha heshiis siyaasadeed. Isbeddellada wanaagsan ee dhawaanahan dhacay ayaa, sikastaba ha ahaatee, loo arki karaa in ay yihiin fursado lagu dejiyo laguna cadeeyo xeerarka tartanka siyaasadda, taasoo gacan ka geysaneysa sameynta isbedello siyaasadeed oo si nabad ah ku dhaca. Faalladan kooban waxa ay dulmar guud ka bixineysaa xaaladahan is-beddelaya iyadoo xalal loosoo bandhigayo daneeyayaasha Galmudug.

1 Habkan waxaa xoogga lagu saarayaa baahida loo qabo in si cadaalad ah loo isticmaalo awoodda, tartan xeerar ku salaysan loogu tartamo awoodda, iyo maamul wanaag, taas oo kasoo horjeedda qeexitaannada kale oo inta badan la midka ah gorgortan siyaasiyiin.

# Arrimaha muhiimka ah ee heshiiska siyaasadeed

Qodobada soo socda ayaa ah arrimaha ugu muhiimsan ee heshiiska siyaasadeed ee Galmudug, kuwaasoo loo tixgelin karo in ay yihiin bar billowga dadaallada wax looga beddelayo heshiiska siyaasadeed.

## Kasoo gudbidda kala qeybsanaan iyo u gudbidda awood siyaasadeed oo mideysan

Caqabadda ugu weyn ee hortaagan in la helo heshiis siyaasadeed oo waara ayaa ah in Galmudug aanay ka jirin awood siyaasadeed oo mideysan. Taas beddelkeeda, dowlad-goboleed tabar yar ayaa ku qasbanaatay in ay la tartanto kooxo madax-bannaan oo saldhigyo kala duwan ku leh dowlad-goboleedka — sida Dhuusamareeb, Cadaado iyo Gaalkacyo. Inkastoo dhaq-dhaqaaqyadan ay soo mareen marxalado kala duwan, waxaa ugu dambeeyay xiisadii u dhexeysay ASWJ iyo dowlad-goboleedka Galmudug, taasoo daciifisay hanaankii maamul u sameynta tan iyo sanadkii 2015. Kadib jabkii militeri ee ASWJ, sikastaba ha ahaatee, Galmudug waxa ay ugu dambeyntii yeelatay hal maamul siyaasadeed oo mideysan, iyadoo aysan jirin maamullo iskasoo horjeeda—marka laga reebo joogitaanka al-Shabaab, oo la yareeyay goobaha ay joogaan, ee dowlad-goboleedka.

## Soo ifbaxa nidaamyo awood qeybsi oo jilicsan

Galmudug hadda waxa ay leedahay dastuur kumeelgaar ah, caasimad iyo baarlamaan metela dhammaan 11-ka beelood ee dega Galmudug. Iyadoo loo marayo habka awood-qeybsiga beelaha ee aan qorneyn, maamulka waxa uu leeyahay madaxweyne, madaxweyne ku xigeen, guddoomiye baarlamaan, ku xigeenno iyo gole wasiirro. Inkastoo heshiiskan awood-qeybsi uu yahay mid aan sal adag lahayn, haddana ma aha mid la isku heysto sida dowlad-goboleedyada kale (tusaale ahaan, Jubbaland iyo Hirshabeelle) waxa uuna awood-qeybsigan yahay bar billow lagu xoojin karo heshiiska siyaasadeed. Qaar kamid ah ka-qeybgalayaasha daraasadda—gaar ahaan kuwa kasoo jeeda beelaha dhulkooda ay al-Shabaab ka talinayeen sanado badan—ayaa muujiyay baahida loo qabo in hannaanka awood-qeybsiga dib loo saxo. Arrin kale oo awood-qeybsi la xiriirta oo muhiim ah ayaa ah in si tartiib tartiib ah guud ahaan gobolka looga sameynayo goleyaal deegaan oo ku saleysan beelo. Tani waxa ay gacan ka gaysatay in la caddeeyo habka awood qeybsiga degmooyinka, inkastoo aysan caqabado la'aan ahayn.

## Dhaqaale la'aan ayaa caqabad ku ah xoojinta awoodda dowlad-goboleedka

Inkastoo kala qeybsanaantii siyaasadeed ay yaraatay, dowlad-goboleedka oo aan lahayn dakhli iyo hormar dhaqaale oo ballaaran ayaa carqaladeynaya rajada laga qabo heshiis siyaasadeed oo waara iyo xoojinta awoodda siyaasadeed. Sida Soomaaliya inteeda kaleba ka jirta, xaaladda dhaqan-dhaqaale ee Galmudug waa mid liidata. Marka loo eego Qorshaha 9-aad ee Horumarinta Qaranka, qiyaastii 80 boqolkiiba dadweynaha waxa ay ku nool yihiin ama ka hooseeyaan khadka saboolnimada.[2] Xaaladda Galmudug waxaa

2 The Ministry of Planning, Investment and Economic Development, *Somalia National Development Plan 2020 to 2024*, Mogadishu: Federal Government of Somalia, 2020, PAGE. Accessed 15 May 2023, https://andp.unescwa.org/sites/default/files/2020-10/Somalia%20National%20Development%20Plan%202020%20to%202024.pdf.

sii xumeeyay maqnaanshaha daba dheeraaday ee hay'adaha iyo adeegyada dowladda, amni-darro daba dheeraatay, colaado baahsan iyo sidoo kale abaaro isdaba joog ah oo muddo tobannaan sano ah halakeeyay gobolka. Xaaladahan oo dhan waxay ka muuqdaan heerarka aadka u hooseeya ee horumarka karaanka iyo aqoonta ee dadka deegaanka. Marka lagu daro xaqiiqda ah in xasillooni darro siyaasadeed ay ka hor istaagtay in maamulladii Galmudug ee is xig-xigey ay horumariyaan awoodaha dakhli aruurinta, dowlad-goboleedka waxa ay leedahay ilo dhaqaale oo aad u kooban, taasoo xaddidaysa habkii loo heli lahaa heshiis siyaasadeed.

## Beelo hubeysan ayaa sii wada colaado kasoo billowday xiligii dagaallada sokeeye

Cilladihii maamul u sameynta Galmudug waxa ay ka muuqata awoodda kooxaha siyaasadeed ee iskasoo horjeeda. Colaadda u dhexeysa kooxaha hubeysan ayaa ah mid kamid ah waxyaabaha sababa xasaradaha Galmudug, gaar ahaan maadaama inta badan beelaha ku nool deegaannada maamulkaas ay weli abaabuli karaan maleeshiyo. Inta ay maqan tahay awood maamul iyo qaabab lagu maareyn karo colaadaha, maleeshiyaadkan ayaa si joogto ah u gala dagaallo inta badan salka ku haya isqabqabsi dhul ama aargoosi dil. Waxaa intaa dheer, dagaallada noocan oo kale ah waxaa sii kordhiya saameynta isbeddelka cimilada iyo dhibaatooyinka bini'aadamnimo ee soo noqnoqda, kuwaasoo cadaadis saara helitaanka daaqa iyo ceelasha biyaha — oo ah inta badan xuddunta colaadaha.

Dagaalka ka dhanka ah al-Shabaab ayaa sidoo kale laga yaabaa inuu saameyn weyn ku yeesho beelaha. Dagaalkan ayaa intiisa badan diiradda lagu saarayaa abaabulka macawisley kasoo jeeda beelaha waaweyn ee Galmudug dega, taasoo qeyb ka ah dadaallada ay kooxdu ku dooneyso in ay dib usoo ceshato degmooyinka laga qabsaday. Maleeshiyo beeleedyadan ayaa laga yaabaa inay ku adkaystaan sheegashada dhulka iyo daaqa, sidoo kalena iska caabiyaan maamulka dowlad-goboleedka, taasoo horseedi karta kala qeybsanaan iyo iska horimaad joogto ah oo u dhexeeya beelaha.

## La-dagaalanka al-Shabaab

Lagasoo bilaabo sanadkii 2006, dagaalka lagula jiro al-Shabaab waxa uu horseeday xasillooni darro wuxa uuna halis geliyay rajada laga qabo in xal siyaasadeed laga gaaro dowlad-goboleedka. Xukunka dheer ee al-Shabaab ee deegaannada Galmudug qaarkood waxa ay u badan tahay in ay si weyn u saamaysay muwaadiniinta deegaannadaas ku nool, oo ay kamid tahay mabda'a fikir ee bulshadaas. Sikastaba ha ahaatee, waxaa hadda muuqata in al-shabaab ay luminayaan dhul hor leh oo ka tirsan maamulkaas, taasoo keeni karta in markii ugu horreysay la mideeyo Galmudug. Xitaa haddii aysan toos u maamulin dhulka, al-Shabaab waxaa laga yaabaa in ay awood u yeeshaan in ay joogteeyaan xiriirka ay la leeyihiin dhulka miyiga ah, taasoo u oggolaanaysa in ay sameeyaan weerarro dhuumaaleysi ah. Waxa kale oo laga yaabaa in ay awood u yeeshaan in ay maamulaan waddooyinka muhiimka ah ee marinada saadka ee u dhexeeya magaalooyinka waaweyn ee Galmudug, waxa ayna u badan tahay in ay sii wadi doonaan saameynta iyo faragelinta colaadaha u dhexeeya beelaha.

## Isku milanka siyaasadeed ee dowladda federaalka iyo Galmudug

Xaalad muhiim ah oo qaabeysa siyaasadda Galmudug waa isku milanka siyaasadda heer qaran iyo heer dowlad-goboleed, taasoo saameyn togan iyo mid tabanba ku yeelata dowlad-goboleedka. Galmudug ayaa si gaar ah xiriir dhow ula leh siyaasadda Muqdisho, iyadoo kooxo isumid ah ay labada dhinac qeyb ka yihiin. Sidoo kale, xiisadaha deegaannada Galmudug ka jira ayaa inta badan keena in ay qeyb ka noqdaan siyaasiyiin heer federal ah, halka loollanka

siyaasadeed ee Muqdisho uu inta badan saameyn ku yeesho Galmudug. Marka la eego maamulka cusub ee Madaxweyne Xasan Sheekh, ilaa iyo hadda waxaa yaraaday xiisadaha u dhexeeya Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo dowlad-goboleedka, taasoo qeyb ahaan suurtagesay in xasilloonida soo hagaagto. Sidoo kale, Galmudug waxa ay si weyn ugu tiirsan tahay dowladda federaalka dhinacyada dakhliga iyo amniga, sida ka muuqata joogitaanka ballaaran ee Ciidamada Xoogga Dalka Soomaaliyeed iyo kuwa Hay'adda Nabadsugidda iyo Sirdoonka Qaranka ee deegaannada Galmudug.

Xaaladdan ayaanan sikastaba ha ahaatee ahayn mid la hubo sii jiritaankeeda. Dhowr arrimood ayaa culeys ku keeni kara xiriirka u dhexeeya dowladda federaalka iyo Galmudug, oo keeni kara xasilooni darro soo cusboonaata. Xiliga iyo qaabka ay u dheceyso doorashada xigta ee Galmudug ayaa khatar ku keeni karta xiriirkooda, gaar ahaan haddii madaxda dowladda federaalka ay isku dayaan in ay qof ay taageerayaan ka dhigaan madaxweynaha Galmudug. Khilaaf ama carqalad kasta oo ku timaada guud ahaan xiriirka dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyada ayaa sidoo kale saameyn ku yeelan kara xiriirka ka dhexeeya dowladda federaalka iyo Galmudug.

### Xiriirka Galmudug iyo Puntland

Taariikh ahaan, waxaa jiray xiisado u dhexeeyay Puntland iyo Galmudug oo salka ku hayay soohdinta labada maamul, iyadoo inta badan xiisadahan ay ka jireen magaalada Gaalkacyo. Sidoo kale waxaa jiray loollan la xiriira kheyraadka iyo dilal aargoosi ah, kuwaasoo saameyn ku yeeshay xasiloonida siyaasadeed ee Galmudug. Dhawaanahan waxaa soo hagaagayay xiriirka ka dhexeeya Galmudug iyo Puntland iyo sidoo kale xiriirka u dhexeeya bulshada Gaalkacyo, taasoo hoos u dhigtay saameynta uu xiriirka labadan maamul ku leeyahay heshiiska siyaasadeed.

### Xiisadaha la xiriira doorashada xigta

Caqabad weyn oo hor taagan xasillooni ballaaran ayaa ah xiisadaha soo ifbaxaya ee la xiriira doorashada xigta ee dowlad-goboleedka Galmudug. Tobankii sano ee lasoo dhaafay, doorashooyinkii dowlad-goboleedyada ayaa ahaaa bilowga khilaafyada marka la eego dowlad-goboleed kasta. Mudnaanta siyaasadeed iyo dhaqaalaha ay doorashooyinku qaataan waxay ka dhigan tahay in ay weecin karaan horumarka dhabta ah ee laga gaarayo heshiiska siyaasadeed iyo mudnaanta kale ee dowlad-dhisidda. Dhinaca kale, Guddiga Doorashooyinka Galmudug oo dhawaan la dhisay iyo sidoo kale ansixinta sharciyada la xiriira ayaa abuuray dardar-gelinta dimuqraadiyeynta dowlad-goboleedka, taasoo fureysa waddo lagu gaari karo heshiis siyaasadeed oo waara loona dhan yahay.

## Talooyin tixgelin mudan

Caqabadaha taariikhiga ah ka sokow, waxaa jira fursad muhim ah oo ah in looga faa'iideysto siyaasadda mideysan ee Galmudug, si horumar dhab ah looga sameeyo wax-ka-beddelka heshiiska siyaasadeed. Waa muhiim in fursaddan laga faa'iideysto, maadaama ay suuragal tahay in uu soo baxo nidaam siyaasadeed oo aanay daneeyeyaal badan heshiis ku ahayn, oo ay mas'uuliyiinta dowlad-goboleedka amarro soo rogaan iyagoo isticmaalayo awood militeri. In khilaaf iyo jahwareer dib loogu noqdo ayaa sidoo kale suuragal ah. Halkan waxa aan kusoo jeedineynaa talooyin tixgelin mudan oo ku wajahan daneeyayaasha Galmudug, oo looga gol leeyahay in lagu hormariyo

rajada laga qabo in dowlad-goboleedku ku naaloodo heshiis siyaasadeed oo waara loona dhan yahay.

- **In la joogteeyo xasiloonida jirta iyadoo la xaqiijinayo in doorashooyinka baarlamaanka iyo madaxtooyada maamulka ay u dhacaan si xor iyo xalaal ah.** Xasiloonida siyaasadeed iyo midnimada hadda jira waxaa si fudud ku burburin kara khilaaf ka dhasha hannaanka doorashada soo socota. In hay'adaha maamulaya dejinta iyo hirgelinta geedi-socodka xilli hore la dhiso lana taageero iyo sidoo kale in laga heshiiyo hannaanka doorashada ayaa kalsooni weyn abuuri karta. Maamulka dowlad-goboleedka waxa uu sidoo kale u baahan yahay in uu u furnaado wada-hadal in uu la galo mucaaradka, gaar ahaan haddii ay sameeyaan iska cabin la xiriirta muddo kordhinta halka sano ah.

- **In la sameeyo dib-u-eegis la xiriirta hannaanka awood-qeybsiga.** Inkastoo heshiiska Galmudug ee awood-qeybsiga beelaha uu ka xoog badan yahay kan dowlad-goboleedyada kale, haddana waxaa muuqata in ay jiraan baahi loo qabo in la xoojiyo, meelaha qaarna, dib-u-eegis lagu sameeyo awood-qeybsiga golaha fulinta iyo xildhibaannada. Arrintaan ayaa si gaar ah usoo if-bixi doonto kadib marka al-Shabaab laga xoreeyo deegaannada ay horay u maamulayeen, taasoo soo kicin karta tabashooyin ay qabaan beelihii laga reebay hanaankii dowlad-dhiska. In la qabto shirar ballaaran oo arrimahan looga hadlayo kadib marka lasoo gabagabeeyo howlgalka militeri ee ka dhanka ah al-Shabaab ayaa noqon kara qaab muhiim ah oo lagu dhiso hab cadaalad ah, loo wada dhan yahay, oo ku saleysan awood qeybsi la isku raacsan yahay.

- **In la taageero geeddi-socodka dhismaha goleyaasha deegaanka ee socda iyo horumarinta guud ee qaab-dhismeedka dowladaha hoose.** Dhismaha goleyaasha deegaanka ayaa abuuraya fursad lagu ballaariyo aqbalaadda iyo sharciyadda shacabka ee maamulka Galmudug iyo maalgelinta dhismaha hay'adaha dowladaha hoose. Maamullo degmo oo leh sharciyad iyo aqbalaad waxa ay sidoo kale kaalin ka qaadan karaan yareynta colaadaha ka dhexeeya beelaha, taasoo xasilooni-darro ka dhalisa Galmudug. Sikastaba ha ahaatee, waxaa jirta khatar ah in dadaallada kor ka imaanaya ee lagu dhisayo laguna maamulayo maamullada hoose ay dhici karto in aanay tixgelin kaar ah siinin hababka awood-qeybsiga deegaannada, taasoo uga sii dari karta khilaafka.

- **In la taageero dib u habeynta hay'adaha amniga, iyadoo la aqoonsanayo baahida loo qabo hab isku-dhaf ah oo kumeelgaar ah.** Isku-dhafka ama hub-ka-dhigista maleeshiyo beeleedyada Galmudug waxa ay lama huraan u tahay heshiiska siyaasadeed. Marka hore waa in arrintan lagu billaabaa qiimeynta kooxaha hubeysan ee ku sugan maamulka iyo in lagala xaajoodo hogaamiyeyaasha siyaasadda iyo kuwa dhaqanka maleeshiyaadka lagu biirin karo Ciidamada Xoogga Dalka, Daraawiishta Galmudug ama booliska dowlad-goboleedka, iyo kuwa lagu sameynayo hub-ka-dhigis iyo dib ula mideynta bulshada. Arrintan ayay u badan tahay in ay qaadan doonto wakhti dheer, waxaana loo baahan yahay in ay u dhacdo qaab waafaqsan hirgelinta qorshaha amniga qaranka ee dib-u-eegista lagu sameeyay.

- **In siyaasado iyo barnaamijyo gaar ah la diyaariyo si looga faa'ideysto fursadaha, laguna yareeyo khatarta ka dhalan karta dhulka al-Shabaab dib looga qabsaday.** Inkastoo jabkii militeri ee al-Shabaab kasoo gaaray Galmudug ay kordhineyso fursadda lagu sheegay faalladan, haddana waxaa muhiim ah in dadaallo wadajir ah oo waafaqsan saddexda talo ee kor ku xusan (in dib ugu noqoshada awood-qeybsiga; taageeridda dowlado hoose oo wax-ku-ool ah sharciyadna leh; dib-u-habeynta hay'adaha amniga) laga hirgeliyo goobaha dib loo qabsaday.

- **In fursado maalgashi loo abuuro ganacsiyada gaarka loo leeyahay, gaar ahaan Hobyo, iyadoo islamar ahaantaana la taageerayo awoodda dakhli uruurinta ee hay'adaha Galmudug.** Masuuliyiinta dowlad-goboleedka (oo taageero ka helaya beesha caalamka) waa in ay raadiyaan fursado ay kusoo jiitaan ganacsiyada gaarka loo leeyahay, iyadoo uu hadafku yahay in lagu dhiirageliyo maalgashiga qeybaha wax-soo-saarka ee muhiimka ah. Tani waxaa kamid noqon kara in dekedda Hobyo laga dhigo bar ganacsi istaraatiiji ah, inkastoo ay tartan kala kulmi doonto dekedaha kale ee Soomaaliya, iyo sidoo kale dekedda Garacad ee dhawaan laga furay Puntland.

- **In la suurto-geliyo bulsho rayid awood u leh in ay abuuraan madallo lagu gorfeeyo siyaasadda si loo maareeyo khilaafyada.** Bulshada rayidka ah waxa ay door xaddidan ku lahayd guud ahaan taariikhda Galmudug. Taageeridda xoogeysiga hay'adaha hadda jira iyo soo ifbaxa kuwo cusub waxa ay noqon kartaa hab muhiim ah oo lagu taageero kaabayaasha nabadda ee dowlad-goboleedka iyo awoodda lagu maareeyo xasilooni darrada siyaasadeed.

- **In taageero muddo dheer ah la siiyo dimuqraadiyeynta Galmudug, oo ay ku jiraan taageeridda guddiga doorashooyinka dowlad-goboleedka iyo dejinta xeerarka la xiriira dimuqraadiyeynta.** Inkastoo laga yaabo in doorashada Galmudug ay qaadato sanado badan, horumarrada dhawaanahan laga sameeyay diyaarinta xeerarka sharci iyo dhismaha Gudiga Doorashooyinka Galmudug ayaa abuuray fursado lagu taageero hannaanka dimuqraadiyeynta ee muddada fog. Taageerada noocan oo kale ah waxaa ka mid noqon kara horumarinta awoodda iyo agabka Gudiga ee wakhtiga fog, iyo in sidoo kale laga caawiyo Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo hay'adaha kale ballaarinta sharciyada doorashada iyo howlaha kale ee la xiriira.

## Xuquuq

Faalladan Kooban waxaa si wadajir ah usoo saaray Somali Dialogue Platform.

Somali Dialogue Platform waa barnaamij Soomaalida ka taageera sidii loo gaari lahaa is-afgarad ku saabsan arrimaha la isku haysto ee siyaasadeed waxaana fuliya Machadka Rift Valley. Somali Dialogue Platform waxaa maalgeliya Foreign, Commonwealth and Development Office (FCDO) ee Boqortooyada Ingiriiska, Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee Denmark, iyo Hay'adda Mareykanka u Qaabilsan Horumarinta Caalamiga (USAID). Aragtiyada faallada kama turjumayaan siyaasadaha rasmiga ah ee Dowlada UK, Dowlada Denmark ama Dowlada Mareykanka. Platform-ku wuxuu leeyahay madaxbannaanida tifaftirka warbixinnaddiisa oo dhan.

Machadka Rift Valley wuxuu ka shaqeeyaa bariga iyo bartamaha Afrika si uu usoo saaro aqoon maxalli ah oo loo adeegsan karo horumarinta arrimaha bulshada, siyaasadda iyo dhaqaalaha.

Xuquuqda daabacaadda © Machadka Rift Valley 2023.

Warbixintan waxaa la daabacay iyadoo la adeegsanayo Creative Commons Attribution-Non-CommercialNoDerivatives License (CC BY-NC- ND 4.0).